

KA WARRAN HADDII DA'YARTA AY DUNIDA HOGGAAMIN LA'HAAYEEN?



MODEELKA YMCA URURRADA QARAMADA MIDDOOBAY, WAY HOGGAAMIYAAN.



KU SOO BIIR IN KA BAHAN 600 OO AH HOGGAAMIYE DA'YAR OO KA WADA YIMID GOBOLKA OO DHAN SI AAD UGU DHAQANTAAN DIBLUMAASIYAD OO AADNA UGA DOODAAN ARRIMAHA CAALAMKA KA TAAGAN EE MEEL KA MID AH BARNAAMIJYADAN:

GOLAHA GUUD: Danaha wadankaaga ugu matal guddiyada oo xalal ka soo jeedi arrimaha caalamka ka taagain oo dhex keen Golaha Guud, oo ah golaha ugu weyn ee sharci dejinta ee Qaramada.

GOLAHA AMNIGA: Baar arrimaha horseedi kara isku dhac ka dhex dhasha caalamka oo na ka wada xaajooda xalinta dhibaatooyinka ammaanka iyo amniga.

GOLAHA DHAQAALAHA IYO BULSHADA: Cilmi-baaris iyo wadahalal laga sameeyo mowduucyo ay ka mid yihiin bay'adda, helitaanka biyaha, iyo xijinta horumar waara si loo keeno xalal dhaqaaluhu xoogeysto oo na horumariya nolasha dadka adduunka oo dhan.

GOLAHA XUQUUQDA AADANAHA: Wax ka baro dadka nugul iyo dadka la haybsooco oo deji hindiseyaal wax looga qabanayo xadgudubyadii/ku-tagrifalkii hore iyo kuwa hadda soo socda.

MADAL CAALAMI: Wax ka baro oo ka wada hadla arrimaha caalamka hadda ka taagan adiga oo isticmaalaya dhaqaalaha, waxbarashada, xaaladda aadanaha, diblomaasiyadda, iyo amniga si loo wargeliyo oo na loo sahamiyo xalal wax ku ool ah.

MAXKAMADDA CADDAAALADDA CAALAMKA: La xalliyo khilaafaadka u dhexeeya dalalka xubnaha ka ah, lagana doodo fasiraadka, iyo in la gaaro go'aanno muhiim ah oo ku salaysan sharciga caalamiga ah.

WARBAAHINTA: Waraysiyo la qabto, la qoro maqaallo iyo qoraallo ra'yi ah, la duubo dhacdooyin muhiim ah, la dejiyo nuxurka warbaahinta dijitaalka ah, oona laga warbixiyo natiijooyinka doorashada ka soo baxay.

XARUNTA ILAAHA KULANKA: La matalo oo na loo doodo hay'adaha kala duwan ee ururrada Qaramada Midoobay, la qaadaadhigo go'aammada lagu go'aaminayo shuruudaha miisaaniyadda, oo doorashada laga maareeyo shirka.

YOUTHVOICE@YMCANORTH.ORG

YMCAYOUTHVOICE.ORG

WAA MAXAY MODEL UN?

Model UN waa barnaamij waxbarasho madani oo gacan-ku-qabasho ah halkaas oo ardayda dhigata fasallada 7-12 ay qaataan door dublamaasi oo ka wada socda mid ka mid ah 193 wadan oo waxay sahminayaan xalalka ay u soo dejinayaan caqabadaha caalamiga ka jira. Da'yarta ku jirta Model UN ma ahan soo daawasho tagayaal; waxay ka wada hadlayaan oo ay doodayaan arrimaha ka taagan caalamka, ay go'aanno ka soo saarayaan, waxay samaynayaan isbahaysi, waxayna qoraan fikrado sharci iyaga oo ku dhaqmaya iskaashi wadashaqayn iyo diblomaasiyad.



MAXAA KU JIRA OO QAYB KA AH BARNAAMIJKA?

WAFDI KU BIIR AMA ABAABUL: Ku xirnow ardayda iyo shaqaalaha iskuulka degmadaada ama ururka bulshada si aad wafdi QM ah ugu biirto ama u abaabusho.

SHIR: Kulanka hore oo tababbar ah kala qaybgal wafdigaaga xiliga dhammaadka jiilaalka.

DIYAARGARAWGA KULANKA KA HOR: Si joogto ah ula kulan wafdigaaga Model UN-ka si aad wax uga barato Qaramada Midoobay iyo wadamada xubnaha ka ah cilmi baarista, ku celcelinta xirfaddaha, iyo u diyaargarowga kulanka.

KULAN: Ku biir ardayda dhigata dugsiyada sare ee Minnesota oo dhan ku baahsan oo seddex maalmood inta lagu jiro horraanta xilliga gu'a kula qaataan Marriott ku yaala farasmagaalada Minneapolis si aad u xoojisaan fekirkaaga muhiimka ah iyo xirfadahaaga bulsho dhexdeeda ka hadalka. Laba habeen ku qaado oo ka boggo cuntooyinka kor lagala socdo ee iskaayweeys iyo ciyaaro fiidka la qabanayo oo ay ku jiraan ciyaaro, bingo, farshaxan, kaariyooki, iyo bandhig karti dabiici ah.

NALA SOO XIRIIR WIIII MACLUUMAAD DHEERAAD AH:



youthvoice@ymcanorth.org



[@ymcayouthvoice](https://www.instagram.com/ymcayouthvoice)



[@ymcayouthvoice](https://www.facebook.com/ymcayouthvoice)



[@ymcayouthvoice](https://twitter.com/ymcayouthvoice)

